**Talaalka Hargabka ee Haweenka Uurka leh**

Xogta Haweenka Uurka Leh 2023-2024

**Xog ku saabsan Waraaqdaan tilmaamaha**

Waraaqdaan ayaa kaaga waramaysa talaalka xili hargabeedka. Waxay kuu sheegaysaa sababta ay muhiim u tahay inaad qaadato talaalka hargabka haddii aad uur leedahay. Waraaqdaan ayaa sidoo kale ku siinaysa talo kale oo muhiim ah iyo xog sida marka iyo sida aad ku helayso talaalka.

Fadlan si taxadar leh u akhri.

**Waa maxay hargabka xiliyeedku (hargabka)?**

Hargabku waa xanuun caabuq oo daran oo ka dhasha fayraska hargabka. Fayrasku wuxuu ku dhacaa marinnada hawada iyo sanbabooyinka.

Hargabku wuxuu ku dhex wareegaa bulshada inta lagu jiro xili hargabeedka. Xili hargabeedka ayaa caadiyan biloowda biloowga Oktoobar wuxuuna socdaa ilaa dhammaadka Abriil.

**Hargabku ma sababi karaa xanuun daran?**

Haa, hargabku wuu sababi karaa xanuun daran wuxuuna khatar nololeed gelin karaa haweenka uurka leh. Caqabadaha hargabka waxaa kamid ah burukiitada, caabuqa sanbabka, iyo, marar dhif ah, fashfashka maskaxda (encephalitis).

Caabuqa hargabka inta aad uurka leedahay ayaa kordhinaaya khatarta dhiciska, ilmaha dhasha asagoo aan shin dhamaysan iyo xataa dilanka.

**Maxaan ugu baahan nahay inaan qaato talaalka hargabka haddii aan uur leeyahay inta lagu jiro xiliga hargabka?**

Inta aad uurka leedahay, waxaad khatar wayn ugu jirta dhibaatooyinka daran haddii aad qaado hargabka. Talaalka hargabku wuxuu kaa difaacayaa hargabka inta aad uurka leedahay, wuxuuna sidoo kale siinayaa difaac ilmahaaga dhashay inta lagu jiro dhawr bilood ee ugu horeeya.

Ilmaha kayar 6 bilood waa carruurta ugu badan ee isbitaalka la dhigo haddii hargab ku dhaco.

**Waa maxay talaalka Hargabku?**

Talaalku waa lad ka caawisa nidaamka difaaca jirka (nidaamka difaaca) si uu ul dgaalamo caabuqyada. Sanad kasta, fayrasyada hargabka ayaa isbadela, marka sanad kasta talaalka hargabka ayaa isbadella si uu u baxsho difaac ka dhan ah noocyada cusub ee fayrasyada hargbka ee la filaayo.

**Heerkee uurka ayay tahay inaan qaato talaalka hargabka?**

Haddii aad uur leedahay inta lagu jiro xiliga hargabka, waa inaad qaadato talaalka hargabka.

Talaalka hargabka ayaa la qaadan karaa heer kasta uurka, laakiin hadba inta aad xili hore qaadato, ayaad helaysaa difaac degdeg ah.

**Uur ayaan lahaa dhammaadka xili hargabeedkii ugu danbeeyay waxaana qaatay talaalka hargabka intaas kadib. Wali uur ayaan leeyahay, marka ma tahay inaan talaalka hargabka qaato hadda?**

Haa. Talaalka hargabka ee xili hargabeedkaan wuu ka duwan yahay talaalka xili hargabeedkii lasoo dhaafay talaalkaana wuxuu hadda ku siinayaa difaac (gaashaan) ka dhan ah noocyada hargabka (noocyada) ee la filaayo xili hargabeedkaan.

**Sidee talaalka hargabku u shaqeeyaa?**

Talaalka hargabku wuxuu ka caawiyaa nidaamkaaga difaaca inuu sameeyo difaacyada jirka (barotiinnada la dagaalama caabuqa) oo ka hortga fayraska hargabka. Haddii aad qaadatay talaalka hargabka uuna kugu dhaco fayraska hargabku, talaalka ayaa kaa difaacaaya inaad jirato.

**Muddo intee le'eg ayay daawada ku qaadanaysaa inay shaqayso?**

Talaalku wuxuu bilaabayaa inuu shaqeeyo labo asbuuc gudahood.

**Amaan miyay ii tahay in la i talaalo?**

Haa. Talaalku badqab ayuu u leeyahay haweenka uurka leh. Talaalka hargabka ayaa la siinaayay haweenka uurka leh in ka badan 50 sano.

**Ka waran dadka xasaasiyada ku qaba ukunta?**

Inta badan dadka xasaasiyada ku qaba ukunta ayaa xasaasiyad ku qabi kara talaalka hargabka. Kala hadal GP gaaga (Dhakhtarka) ama farmashiilaha.

**Yay tahay inuusan qaadan talaalka Hargabka?**

Waa inaadan qaadan talaalka hargabka haddii aad xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday kuuro hore oo kamid ah talaalka hargabka ama qayb kamid ah talaalka.

Waa inaadan qaadan talaalka haddii aad qaadato daawooyinka loo yaqaano isku dhafka isku dhafan ee baxnaaninta (tusaale, ipilimumab lagu daray nivolumab) kuwaasoo lagu daweeyo kansarka.

Waa inaadan qaadan wax talaalka hargabka ah haddii aad qabto neutropoenia aad u xun *heerarka hooseeya ee nooca unugyada dhiiga cad); marka laga reebo dadka qaba autoimmune neutropenia rasmiga ah.

**Goorma ayay tahay inaad dib u dhigto qaadashada talaalka?**

Waxaa jira sababo dhawr ah oo ay tahay inaad dib u dhigto qaadashada talaalka. Hase yeeshee, waa inaad dib u dhigtaa balantaada talaalka haddii aad la xanuunsan tahay qandho (heerkul) ka sareeya 38°C. Kala hadal GP gaaga (Dhakhtarka) ama farmashiilaha waqtiga ugu haboon ee aad dib ugu dhigan karto balantaada.

**Talaalka hargabku ma igu ridi karaa hargab?**

Maya. Talaalka hargabku kuguma ridi karo hargabka.

**Talaalka hargabku ma iga difaaci doonaa COVID-19?**

Maya. Talaalka hargabku kaama difaaci karo COVID-19. Waa muhiim inaad qaadato lababada talaalka hargabka iyo talaalka COVID-19. Tan waxaa sabab u ah in Hargabka iyo COVID-19 ay sababaan fayrasyo kaladuwan.

Hargabka iyo COVID-19 ayaa labaduba keeni kara xanuun daran haddii aad qaadatana waxaad u baahan kartaa in lagu dhigo isbitaalka. Way adkaan kartaa inaad kala saarto astaamaha hargabka iyo astaamaha COVID-19.

National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaranka)
www.hse.ie/flu
Koodhka Amarka: HN100720
Agoosto 2023

Haddii aad qaadatay talaalka COVID-19 wali waa inaad qaadataa talaalka hargabka. Waxaad qaadan kartaa talaallada COVID-19 isla marka aad qaadanayso talaalka hargabka haddii laguu yabooho

**Waa maxay dhibaatooyinka ka dhalan kara talaalka?**

Ciladaha ka dhalan kara ee ugu badan waa kuwo yar. Waxa ku jiri kara xanuun, gaduudasho iyo barar kaa fuulaaya meesha cirbada lagaaga dhuftay.

Madax xanuun, murqe xanuun iyo daal ayaa sidoo kale jiri kara. Ciladahaan ka dhalan kara ayaa socon kara dhawr maalmood.

Xasaasiyadaha daran waa kuwo dhif ah; xasaasiyad alarji oo xun ayaa ku dhacda mid kamid ah milyankii qof ba.

**Ka waran haddii aan wali xanuunsanahay kadib talaalka?**

Haddii aad qabto qandho kadib talaalka, liq baristamool. Waa amaan inaad liqdo marka aad uurka leedahay waxayna kaa caawinaysaa adiga iyo cunugaaga inaad iska ilaalisaan qandhada.

Ha liqin ibuprofen ama aspirin **ilaa in** Dhakhtarkaagu kuu qoro maahee.

Xusuusnow: Haddii aad xanuunsan tahay kadib marka lagu talaallo, waxaa keeni kara sabab kale. Ha u qaadan in talaalka hargabku keenay.

Haddii aad dareemayso qandho, guriga joog oo wac dhakhtarkaaga guud (Dhakhtarka) si uu kuu siiyo tallo caafimaad.

**Xagee ayaan ka helayaa talaalka hargabka?**

Waxaad ka helaysaa talaalka hargabka dhakhtarkaaga guud (Dhakhtarka) ama farmashiilaha.

Haddii aad tahay shaqaale caafimaad, goobtaada shaqada ayaa talaalka kugu siinaysa adoo shaqada ku jira.

**Waa meeqa talaalka hargabku?**

Talaalka iyo tallada aad ka hesho Dhakhtarkaaga Guud (Dhakhtarka) ama farmashiiluhu waa bilaash.

Fadlan balan ka qabso Dhakhtarkaaga Guud (Dhakhtarka) ama farmashiilaha hadda.

Si aad u hesho xog dheeraad ah ka fiiri: [www.hse.ie/flu](http://www.hse.ie/flu).

Waxaad sidoo kale heli kartaa lifaaqyada aad ka helayso waraaqaha xogta ee bukaanka oo ka hadlaaya talaallada barta www.hpra.ie. Raadi Influvac Tetra.

**Bayaanka Sirta:**

Si talaalka loogu baxsho si amaan ah, loona qoro dhammaan xogta muhiimka ah ee la socoshada iyo maareynta talaallada, HSE ayaa ka shaqeyn doonta xogta shaqsiga ah ee cunugaaga. Dhammaan xogta ay ka shaqeyso HSE ayaa la waafajin doonaa sharciyada kaladuwan ee difaaca xogta ayna ku jiraan Sharciyada Difaaca Xogta 1988-2018, qaanuunka (EU) 2016/679 (Qanuunka Difaaca Xogta Guud, GDPR), iyo Sharciga Aqoonsiyada Caafimaadka 2014. Adeegsiga xogta cunugaaga ayaa noqon doonto mid sharciga waafaqsan oo cadaalad ah. Waxaa keliya loo adeegsan doonaa ujeedooyin gaar ah ayna ku jiraan, maareynta talaallada, soo sheegista iyo la socoshada barnaamijyada talaalka, xaqiijinta macaamiisha iyo bixinta daryeelka caafimaadka. U kala gudbinta xogta waaxaha HSE ayaa sidoo kale la samayn karaa.

National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaranka)
[www.hse.ie/flu](http://www.hse.ie/flu)
Koodhka Amarka: HN100720
Agoosto 2023

**Xafiiska qaran ee talaalka www.hse.ie/flu**

**Koodhka Amarka: HNI00720 Agoosto 2023**

National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaranka)
www.hse.ie/flu
Koodhka Amarka: HN100720
Agoosto 2023